
# IHL IYO XILLIGAN COVID-19 GAAR AHAAN QAABKA

Iyadoo ay la daalaadhacayayaan sanado dagaal, burburin, sii yaraanshaha adeegyada aasaasiga ah iyo barakac, dadka ku dhex nool iska-horimaadyada hubaysan ayaa hadda qaab COVID-19 ahaan u wajahayaan cabsi xoog leh. Iyada oo dad badan nolol ahaan ku tiirsanyihiin gargaarka bani'aadamnimo, hadana yaanan iloobin in xeerka caalamiga ee bani'aadamnimada(IHL) dhowritaan muhiim ah siinaayo dadka ay saameeyeen iska-horimaadyada hubaysan-xitaa inta lagu guda jiro cudurka saf-marka ah.





## BIXINTA DARYEELKA CAAFIMAADKA

Dhismayaal caafimaad oo si fiican loo qalabeeyey oo shaqaale ku filan leh ayaa lagama maarmaan u ah bixinta daryeel caafimaad oo ballaaran iyada oo dillaaca COVID-19 uu si cad u muujiyay. Shaqaalaha caafimaadka, waaxaha daryeelka caafimaadka iyo tas-hiilaadka gadiidka waa in laga dhowraa weerar inta lagu jiro isku- dhaca.





## BIYO SIINTA

Inta lagu jiro isku-dhaca, shabakadaha biyaha oo ay ku jiraan fayo-dhowrka iyo qalabka biyo qaybinta la rakibay ayaa waxaa laga dhowraa weerar labadaba agabyada rayidka iyo agabyada lagama maarmaanka u ah jiritaanka dadweynaha rayidka ah.





## GARGAARKA BANI'AADAMNIMADA

Maadaama Dawladuhu ay qaadayaan tallaabooyin ay ku xakameynayaan faafitaanka fayraska, waxay noqon doontaa muhiim in la hubiyo in gargaarka bina-aadamnimo ee eex-la'aanta ah gaarayo dadweynaha nugul iyo in shaqaalaha gargaarka ay awood u yeeshaan in ay sii wadaan caawinta kuwa aadka ugu baahan.





## SHAKHSIYAADKA SIDA GAARKA AH UGU SUGAN KHATAR

Waa lagama maarmaan in la hubiyo in dadka da'da ah, dadka naafada ah, kuwa qaba xaalado caafimaad oo hore u jiray iyo nidaamyada difaaca jirkooda daciifay aan la iloobin. Da'dooda ama xaaladdooda jir ahaaneed ayaa waxay ku adkayn karaan inay u hoggaansamaan tallaabooyinka ka hortagga ah ee caafimaadka, sidaas darteed gelinaya halis sare oo caabuq ah.




## MAXAABIISTA

Xarumaha xabsiyada ee buux-dhaafka ah ama aan haysan nadaafad ku filan ama kaabayaasha hawo siinta ayaa keenta caqabad halis ah marka ay tahay ka hortagga faafitaanka cudurrada faafa sida COVID-19. Waxaa lagu talinayaa in xarumaha xabsiyada cudurka ka baaraan dadka cusub oo imaanaya, rakibaan meelaha gacmo-dhaqashada iyo in ay abuuraan qolal karantiil ah.




## BARAKACAYAASHA, MUHAAJIRIINTA, MAGANGALYO-DOONKA IYO QAXOOTIGA

Dhammaan dadka rayidka ah ayaa laga dhowraa waxyeellada colaadaha hubaysan iyo in si sharci darro ah xoriyadda looga qaado. Tani waxay si la mid ah u khusaysaa dadka gudaha ku barakacay, muhaajiriinta, magangalyo-doonka iyo qaxootiga, kuwaas oo si gaar ah baylah ugu yihiin faafida cudurka COVID-19, marka loo eego duruufahooda nololeedka adag oo joogtada ah.




## CARRUURTA IYO WAXBARASHADA

IHL waxaa ku jira xeerar dhinacyada ku lugta leh isku- dhaca uga baahan yahay in ay fududeeyaan helitaanka waxbarashada. Si kastaba, dugsiyo badan ayaa si ku meel gaar ah loo xirey cudurka saf-marka dartiis. In kasta oo ay tahay tallaabo ka hortag oo muhiim ah, waxay culeys dheeraad ah saaraysaa sii wadidda waxbarashada, gaar ahaan meelaha ay ka jiraan iska -horimaadyada hubaysan.

WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH OO KU SAABSAN SIDA IHL U DHOWRAYO INTA LAGU JIRO SAF-MARRADA, FADLAN BOOQO:
https://www.icrc.org/en/document/covid-19-how-ihl-provides-crucial-safeguards-during-pandemics

ICRC